JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

## XEERKA AASAASKA HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA
## XEER LR.92/2020

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

*Sannadka 2022*

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

# Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-6647/042021** **Taar: 12/04/2021**

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Hay'adda Caymiska, Xeer Lr. 92/2020**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 38aad, 76aad, 77aad, 78aad iyo 79aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-45/881/2021, ee ku taariikheysan 27/03/2021, ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hay'adda Caymiska, Xeer Lr. 92/2020;

**Waxaan soo-saaray;**

**Dhaqan-galka Xeerka Hay'adda Caymiska, Xeer Lr. 92/2020.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Hay'adda Caymiska**

**XEER LR: 92/2020**

## Golaha Wakiiladdu

**Markuu Arkay:** Qodobada 38aad, 76aad 77aad, 78aad iyo 79aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Arkay:** Baahida wayn ee loo qabo dhismaha Hay'add Qaran oo taabo galiya shirkaddo madax-bannaan oo caymis ah si dalka ay uga hirgalaan adeegyadda caymisyada ee kala duwan.

**Markuu Aqoonsaday:** In si weyn loogu baahan yahay xeer lagu aasaaso Hay'add Qaran oo madax bannaan una xil saaran maamulka iyo sharciyeynta shirkadaha caymiska ee dalka.

**Markay u cadaatey** In caymisku kaalin muhiim ah ka qaato horumarka dhaqaalaha, isagoo bixinaya adeeg iyo nidaam lagaga kabanayo khasaraha mood iyo noolba leh ee ka dhasha shilalka iyo aafooyinka dabiiciga ah.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Hay'adda Caymiska oo ay Golaha Wakiilada u soo gudbisay

| | |
|---|---|
| Markuu Arkay: | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:92/2020** ee Golaha Wakiiladu U Gudbiyeen Golaha Guurtida JSL Kuna taariikhsanayd **30/12/2020.** |
| Markuu Arkay: | Go'aanka Ansixinta Xeer **LR:92/2020** ee Golaha Guurtida JSL kuna Taariikhsanayd **15/03/2021.** |
| Markuu Arkay: | In Golaha Guurtida wax-ka-bedel iyo kaabis ku sameeyeen kuna ansixiyeen laba iyo afartan **(42)** cod **Xeerka Hay'adda Caymiska** LR:92/2020 |

# WUXUU

Cod aqlabiyad ah **39 cod oo** gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Hay'adda Caymiska (Xeer Lr. 92/2021).**

**ALLAA MAHAD LEH**

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada**

**Baashe Maxamed Faarax**
**Guddoomiyaha/Golaha Wakiilada JSL.**

JAMHUURIYADA SOMALILAND

# GOLAHA WAKIILLADU

**Markuu Arkay:** Qodobada 38$^{aad}$, 76$^{aad}$ 77$^{aad}$, 77$^{aad}$ ,78$^{aad}$ iyo 79$^{aad}$ ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

**Markuu Arkay:** Baahida wayn ee loo qabo dhismaha Hay'add Qaran oo taabo galiya shirkaddo madax-bannaan oo caymis ah si dalka ay uga hirgalaan adeegyadda caymisyada ee kala duwan.

**Markuu Aqoonsaday:** In si weyn loogu baahan yahay xeer lagu aasaaso Hay'add Qaran oo madax bannaana una xil saaran maamulka iyo sharciyeynta shirkadaha caymiska ee dalka.

**Markay u cadaatey** In caymisku kaalin muhiim ah ka qaato horumarka dhaqaalaha, isagoo bixinaya adeeg iyo nidaam lagaga kabanayo khasaraha mood iyo noolba leh ee ka dhasha shilalka iyo aafooyinka dabiiciga ah.

**Markuu Arkay:** Soo jeedinta Xukuumada ee Qabyo-qoraalka Xeerka Hay'adda Caymiska oo ay Golaha Wakiilada u soo gudbisay

## WUXUU ANSIXIYAY

Xeerka Hay'adda Caymiska

Xeer Lr. 92/2020



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA 1AAD
## QODOBBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca iyo Adeegsiga Xeerka

1. Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Aasaaska Hay'adda Caymiska Qaranka Xeer Lr. 92/2020
2. Xeerkan waxaa loo adeegsanayaa dhammaan hawlaha ay qabato Hay, adda Caymiska Qaranka iyo mas'uuliyadda guud ee Hay'adda oo ku fidsan Dalka Jamhuuriyadda Somaliland

### Qodobka 2aad
### Erey Bixin

Xeerkan dhexdiisa Waxa erayadan loo fasirayaa haddii aanu nuxurka tuduca ay ku jiraan micno kale siinin sida tan:

**Hay'ad: -** Waxa loola jeedaa Hay'adda Caymiska Qaranka JSL ee xeerkan lagu Aasaasay.

**Shirkad: -** Waxa loola jeedaa shirkad caymis oo si xeerka waafaqsan loo siiyay ruqsad.

**Xeer: -** Waxaa loola jeeda Xeerka Hay'adda Caymiska Qaranka

**Wakiil: -** Waxa loola jeedaa xafiisyada metalaya shirkadaha adeegga caymiska fidiya ee wakaalad rasmiya ka haysta shirkadaha ay meteleyaan (Insurance Agencies), isla markaana ruqsad ka haysata Hay'adda Caymiska Qaranka.

**Khidmdle: -** waxa loola jeedaa xafiisyada u shaqeeya hab dilaalis ah (Insurance Brokers) ee ay ruqsadda siisay Hay'adda Caymiska Qaranku

**Baanka: -** Waxaa loola jeedaa Baanka Dhexe Ee Jamhuuriyadda Somaliland

**Guddoomiye: -** Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska

**Gudiga Hogaaminta: -** Waxaa loola jeedaa Guddiga Hogaaminta Siyaasadda Caymiska ee xeerku dhisay.

### Qodobka 3aad
### Fasiraadda Xeerka

Xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Mas'uuliyadda Hay'adda iyo xeerarka dalka ee khuseeya hawlaha ay qabato Hay'adda Caymiska Qaranku.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 4aad
## Ujeeddooyinka Xeerka

Ujeeddada xeerkan waa: -

1. In la abuuro Hay'ad u xilsaaran hirgalinta, maamulka iyo horumarinta adeegyada caymiska noocyadiisa kala duwan.
2. In la helo nidaam hufan oo lagu caymiyo hantida kala duwan iyo bed-qabka shaqaalaha
3. In lagu caymiyo adeegyada ganacsi ee maal-gashiga dalka oo xudun u ah koboca dhaqaale ee dalka JSL.
4. In la helo hannaan sharci oo loo raaco ruqsad bixinta iyo ogolaanshaha shirkadaha caymiska
5. In la abuuro fursado shaqo-abuur oo ka imanaya adeegyada caymiska.

# QAYBTAA LABAAD
# HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA

## Qodobka 5aad
## Aasaasidda Hay'adda Caymiska Qaranka

1. Xeerkan waxa lagu aasaasay Hay'adda Caymiska Qaranka oo yeelanaysa jiritaan qaanuuni ah, isla markana mas'uuliyaddeeda u gudanaysa si xeerkan waafaqsan,

2. Hay'adda Caymiska Qaranku waxay ka mas'uul noqonaysaa dhammaan maamulka iyo horumarinta hawlaha caymiska noocyadiisa kala duwan.

3. Hay'adda caymisku, si ay u gudato waajibadkeeda, waxay yeelanaysaa hanti guurto iyo mid maguurto ah, waxayna yeelanysaa qofnimo qaanuuneed oo ay ku geli karto heshiis kasta si sharciga waafaqsan, kuna dacwayn kartaa ama lagu dacwayn karaa.

## Qodobka 6aad
## Madax-banaanida Hay'adda Caymiska

1) Hay'adda Caymiska Qaranka JSL waxay u madax-bannaan tahay gudashada xilkeeda iyo waajibaadkeeda si waafaqsan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka.
2) Xil-gudashada Hay'adda Caymiska Qaranka waxa saldhig u ah Shareecadda Islaamka, Dastuurka JSL, Xeerkan iyo xeerarka kale JSL ee caymiska la xidhiidha.
3) Hay'adda Caymiska Qaranku iyadoo ka wakiil ah Xukuumada JSL waxay heshiis iskaashi/hormarineed la gali kartaa hay'adaha dhiggeeda ah ee dalalka shisheeye, marka ay ogolaansho ka hesho Guddiga Hogaaminta.
4) Xarunta guud ee Hay'addu waxay noqonaysaa Caasimadda JSL ee Hargeisa, waxaana ay laamo ka furan kartaa Gobollada dalka haddii loo baahdo.
5) Hay'addu waxay yeelanaysaa qaab-dhismeed u sahla xil-gudashadeeda oo lagu salaynayo waajibaadka xeerkan saaray.

## Qodobka 7aad
## Xilka iyo Waajibaadka Hay'adda Caymiska Qaranka

Hay'adda caymiska qaranku waxay yeelanaysaa xilalka iyo waajibadyadan hoos ku xusan:

1) Dajinta siyaasadda Qaranka ee lagu hagayo abuurista nidaam dhamays tiran oo lagu taabbo-gelinayo caymiska iyo noocyadiisa kala duwan.
2) Ka tala- bixinta iyo Diyaarinta xeerarka lagu dhisayo shirkado caymis oo madax-bannaan oo gaar loo leeyahay iyo dhammaan xeerarka lagu maamulayo.



XAFIISKA QARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR ... OFFICE

3) Jaan-goynta, kala xadeynta, ruqsad siinta, ruqsad kala noqoshada, hakinta Ruqsadda iyo hubinta tayada adeegyada caymiska ee shirkaduhu u fidinayaan macaamiisha.
4) Baadhista, ka garnaqista cabashooyinka, xallinta khilaafyada maamul ee shirkadaha caymiska dhexdooda, ta macaamiisha & go'aan ka gaadhistooda.
5) Kormeerka iyo ilaalinta guud ahaan nidaamka caymiska dalka iyo adeegyada caymiska.
6) Xadeynta khidmadaha adeegyada caymiska iyo habaynta heerka tayada adeegyada caymiska (Service Standards).
7) Ilaalinta xuquuqda macaamiisha, ta shirkadaha caymiska & dhowrista sumcadda iyo danaha Qaranka.
8) Diyaarinta war bixin sanadeedka Hay'adda iyo u gudbinta hay'adaha Qaranka ee xeerkani waajibiyo.
9) Hubinta bixinta cashuuraha iyo takaaliifta la xidhiidha caymiska ee xeerku waajibiyey.
10) In hay'addu wada shaqeyn dhow iyo iskaashi la yeelato Hay'adaha Qaranka iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ay shaqo-wadaagta yihiin.
11) Wacyi-galinta bulshada iyo kor u qaadista aqoonta la xidhiidha adeegyada caymiska iyo is cayminta.
12) Hawl-gelinta markii loo baahdo khubaro ay u xil saarto hawlo mucayin ah oo looga maarmi waayey, si loo horumariyo xil-gudashada hay'adda
13) Waxay Hay'addu qaadaysaa dhammaan talaabooyinka lagu fulinaayo xeerkan ee lagama maarmaanka u ah.
14) Si ay Hay'addu waajibaadkeeda shaqo u gudan karto, waxay heshiis la geli kartaa dhinacyo kale ama ciddii takhasus u leh hawlaha caymiska sida: - xeel- dheerayaal caymis, gudiyo la talineed & la-taliyayaal madax-bannaan iyada oo la socodsiinaysa dhammaan go'aammada ay gaadhaan cidda ay ka khusayso Qaranka, gaar ahaan guddida hoggaaminta.

## QAYBTA SADDEXAAD
## QAAB-DHISMEEDKA IYO MAAMULKA HAY'ADDA CAYMISKA QARANKA

### Qodobka 8aad
### Qaab-dhismeedka Hay'adda

Qaab-dhismeedka Hay'adda Caymisku waxa uu ka kooban yahay;
1) Guddida Hoggaaminta Hay'adda Caymiska, (Governing Board).
2) Guddoomiyaha Hay'adda.
3) Guddoomiye-ku-xigeenka Hay'adda.
4) Waaxyo iyo laamo heer gobol ah.
5) Hay'addu waxay yeelanaysaa Aagaasime Guud, oo xilkiisa u gudanaya si waafaqsan Qodobka 25aad ee Xeerka Kala-xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa-bannaan Xeer.Lr71/2015.

### Qodobka 9aad
### Guddida Hoggaaminta Siyaasadda Hay'adda Caymiska

1. Hay'adda Caymiska Qaranku waxay yeelanaysaa Guddida Hoggaaminta siyaasadda Hay'adda Caymiska oo ka kooban

b. WasiirkaWasaaraddaH.Maaliyadda "Guddoomiye",
t. Guddoomiyaha Baanka Dhexe Xubin
j. Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska Xubin
x. Xubin ay soo xuleen Ururka Qareennada "Xubin"
Kh. Dalladda Shirkadaha Caymiska "Xubin"
d. Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga. Xubin
e. Xubin ay soo xushay wasaaradda Diinta iyo Awqaaftu oo lagu soo xulo aqoont a uu u leeyahay cilmiga dhaqaalaha islaamiga ah.
f. Guddida waxaa Madaxweynuhu ku soo saarayaa Xeer Madaxweyne



XAFISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 10[aad]

## Xilka iyo Waajibaadka Guddida Hoggaaminta

1) Guddidu waxay u xil saaran tahay hoggaaminta guud iyo la socodka hab-sami u socodka hawlaha iyo shaqooyinka Hay'adda.
2) si ay waajibaadkaasi u gudato, guddidu waxay qabanaysaa hawlahan soo socda:
    a) Ansixinta siyaasadda guud ee caymiska qaranka (Insurance Policy).
    b) Dib u eegista iyo ansixinta qorshayaasha istiraatiijiyadeed, ganacsi iyo maaliyadeed ee Hay'adda.
    c) kormeerista iyo dabagalka hawlgallada iyo Waajibaadyada Hay'adda;
    d) Ansixinta qorshaha maalgashi ee Hay'adda.
    e) Ansixinta miisaaniyadda hay'adda, qaab-dhismeedka iyo soo saarista qorshayaasha guud ee adeegyada caymiska
    f) Dib u eegista go'aannada maamul ee ka soo baxa Hay'adda Caymiska Qaranka marka rafcaan loo soo qaato muddo 30 maalmood gudahood ah.
    g) Ka talo bixinta magacaabidda iyo guddoomiyaha iyo ku-xigeenka Hay'adda.
    h) Qabashada shaqooyinka kale ee ay dhigayaan xeerkan, xeerka caymiska iyo xeerarka kale ee khuseeya.
3) Guddidu waxay madaxweynaha u gudbinaysaa warbixin sanadeedka hawlohooda shaqo.

## Qodobka 11[aad]

## Fadhiyada Guddida

1) Fadhiyada guddidu waxay noqonayaan kuwo joogto ah oo ugu yaraan sannadki 4 jeer qabsooma iyo kuwo aan joogto ahayn haddii loo baahdo.
2) Qabsoomidda Fadhiyada aan joogtada ahayn waxaa soojeedin kara guddoomiyaha guddida, sidoo kale waxaa soojeedin kara ugu yaran saddex xubnood oo qoraal ku soo jeedinaya.
3) Fadhiyada guddidu waxay ku qabsoomayaan marka ay soo xaadiraan ugu yaraan (4) afar xubnood.
4) Fadhiyada guddida waxa guddoominaya guddoomiyaha guddida, haddii uu maqan yahayna cidda uu u igmado.
5) Go'aamada guddidu waxay ku ansaxayaan hal dheeri
6) Guddidu wuxuu yeelanayaa xog-hayn ka caawisa ururinta hadal-qoraalka, oo guddoomiyuhu magacaabo kaddib markuu la tashado xubnaha guddiga.

## Qodobka 12[aad]

## Magacaabista iyo Xil ka Qaadista Guddoomiyaha & Guddoomiye ku xigeen Hay'adda

1) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-ku-xigeenka Hay'adda Caymiska Qaranka waxaa magacaabaya Madaxweynaha JSL, waxaana cod hal dheeri ah ku ansixinaya Golaha Wakiillada.
2) Guddoomiyaha & Guddoomiye ku xigeen Hay'adda waxa xilka ka qaadi kara oo kaliya Madaxweynaha JSL

## Qodobka 13[aad]

## Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-Xigeen Hay'adda

1) Shuruudaha looga baahan yahay guddoomiyaha iyo guddoomiye xigeenka Hay'adda caymiska qaranku waa:
    a) In ay yihiin muwaadiniin reer Somaliland ah.
    b) In ay yihiin Muslim, asluub & akhlaaq wanaagsan bulshada ku dhex leh.
    c) In ay leeyihiin aqoon waxbarasho heer jaamacadeed ah haystana ugu yaraan shahaadada darajada 1aad (Bachelor Degree)
    d) In ay leeyihiin khibrad shaqo oo aan ka yareyn 5 sanadood.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

e) In aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ah 5 tii sano ee ugu danbeeysay.
f) In ay maskax ahaan fayow yihiin.
g) In ay ku sifoobaan xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan isla markaana leeyihiin sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.

## Qodobka 14aad

## Shuruudaha Xil ka Qaadista Guddoomiyaha iyo Guddoomiye-Xigeenka Hay'adda

1) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigeenka waxa xilka laga qaadi karaa shuruudahan:

a) Marka uu xilka gudan kari waayo karti darro awgeed taas oo fadhiid ka dhigta hawshii Hay'adda
b) Marka uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq-maasuq iwm.
c) Marka uu is-casilaad qoraal ah u gudbiyo Madaxweynaha, Madaxweynuhuna ka aqbalo.
d) Marka uu galo dambi Ciqaabtiisu gaadhayso ugu yaraan (3) Sanno.
e) Marka uu gudan kari waayo xilkiisa sababo caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay caddeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diwaangashan Komishanka Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka.

## Qodobka 15aad

## Shuruudaha Magacaabista Agaasimaha Guud Ee Hay'adda

1) Si loola xisaabtami karo isla markaana aan culays shaqo uga iman, loona waafajiyo aqoonta ay hawshan shaqo u baahan tahay, Hay'addu waxay yeelanaysaa Agaasime Guud oo uu magacaabo Madaxweynaha JSL.
2) Agaasimaha Guud ee Hay'adda Caymisku waa;
   a) In uu yahay qof aqoon u leh maamulka & maareynta, isla markaana hanan kara hawl maalmeedka Hay'adda.
   b) In uu leeyahay ugu yaraan aqoon jaamacadeed heerka 1aad (Bachelor Degree) iyo waayo aragnimo shaqo oo aan ka yareyn 5 sanno.
   c) In uu Ku sifoobay akhlaaq wanaag, karti iyo hufnaan shaqo.

3) Qofna looma magacaabi karo Agaasimaha Guud ee Hay'adda haddii;
   a) Uu yahay saamiile Shirkadaha caymiska, ama uu yahay xubin ka mid ah Guddi shirkad caymis ama shaqaale shirkad caymis.
   b) Uu yahay Qof lagu xukumay fal-dambiyeed la xidhiidha khiyaamo ama daacad-darro oo ay ku xukuntay Maxkamad awood u leh oo ku taala Somaliland ama meel kale.
   c) Haddii uu yahay sarkaal dawladeed, xubin ka tirsan golayaasha sharci dejinta ama xubin ka tirsan goleyaasha deegaanka, haddii aanu xilkaas iska casilin magacaabista ka hor.

## Qodobka 16aad

## Xilka & Waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda

Xilka iyo waajibaadka Guddoomiyaha Hay'adda Caymiska Qaranka waxa ka mid ah: -

1) Hoggaaminta guud ee Hay'adda.
2) Socodsiinta, hagista iyo maamulidda dhammaan hawlaha Hay'addu u xil saaran tahay.
3) Maamulka iyo maaraynta hawl-maalmeedka Hay'adda
4) Metelaadda iyo ku hadalka magaca Hay'adda.
5) Guddoominta shirarka guud ee Hay'adda.
6) Soo jeedinta miisaaniyadda Hay'adda, markuu la tashado xubnaha hoggaanka fulinta



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

7) Go'aaminta iyo soo bandhigidda dhammaan qorshayaasha iyo barnaamijyada horu marineed, xisaab xidhyada iyo dhammaan wixii kale ee la xidhidha hawsha Hay'adda.
8) Saxeexidda heshiisyada iyo dhekumentiyada rasmiga ah iyo kuwa maaliyadeed ee Hay'adda.
9) Qorshaynta, kormeerka iyo dabagalka waajibaadka Hay'adda si waafaqsan siyaasadda xukuumadda iyo qorshaha Hay'adda.
10) Isku dubaridka qorsheyaasha kala duwan ee lagu hormarinayo hawlaha Hay'adda.

## Qodobka 17aad
## Xilka iyo Waajibaadka G/xigeenka Hay'adda

Xilka iyo waajibadka guddoomiye xigeenka Hay'adda waxa ka mid ah:

1) Gudashada xilka Guddoomiyaha Hay'adda mar kasta oo uu Guddoomiyuhu maqan yahay & marka ay bannaanaato jagada Guddoomiyaha Hay'addu.
2) Wuxuu ka caawinayaa guddoomiyaha habaynta hawlaha kala duwan ee shaqo.
3) Gudashada waajibaadka kale ee Guddoomiyuhu u igmado.

## Qodobka 18aad
## Xilka & Waajibaadka Agaasimaha Guud

Xilka iyo waajibadyada agaasimaha guud waxa ka mid ah: -

1) Gudashada hawl maalmeedka Hay'adda Caymiska Qaranka JSL.
2) Hawl-galinta dhammaan shaqaalaha Hay'adda Caymiska iyo kormeeridda hawl maalmeedkooda.
3) Isku xidhka xafiisyka Hay'adda iyo shirkadaha caymiska.
4) Soo diyaarinta warbixinaha Hay'adda (Bille, 3 biloodle, lix biloodle iyo sanadlaha ah).
5) Dhaqan galinta & fulinta awaamiirta & go'aannada Hay'adda ka soo baxa.
6) Qabashada dhammaan hawlaha kale ee Guddoomiyuhu u igmado.

## Qodobka 19aad
## Shaqaalaha Hay'adda Caymiska

1) Hay'addu waxay yeelanaysaa shaqaale loo raacay si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Dawladda.
2) Waxa shaqaalaha xilka lagaga qaadi karaa ama shaqada looga eryi karaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawladda.
3) Hay'adda caymisku waxay yeelan kartaa khubaro la talineed iyada oo xilkooda iyo muddada shaqadooda lagu faah-fahinayo heshiis leh muddo cayiman isla markaana ay go'aamiso Hay'addu.

## Qodobka 20aad
## Mushaharka & Gunooyinka

1) Guddoomiyaha, guddoomiye-ku-xigeenka iyo agaasimaha guud waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno xil, si waafaqsan miisaaniyadda Hay'adda ee loo ansixiyo.
2) Mushaharka iyo xuquuqda maaliyadeed ee ay yeelanayaan shaqaalaha kale ee Hay'adda Caymiska Qaranku waxa loo raacayaa si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawladda iyo xeerarka kale ee dalka.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA AFRAAD:
## DAKHLIGA HAY'ADDA CAYMISKA

### Qodobka 21aad
### Ilaha Dakhli ee Hay'adda Caymiska Qaranka

1) Illaha Dakhli ee Hay'adda Caymiska Qaranku waxay kala yihiin: -
   a) Miisaaniyadda ay u qoondayso xukuumadu oo ka mid noqonaysa miisaaniyadda qaranka.
   b) Qaadhaanka/khidmadda caymiska (Insurance Levy) ee ay shirkadaha caymiska iyo wakiilladoodu u qabtaan Hay'adda caymiska qaranka.
   c) Deeqaha ay ka hesho deeq-bixiyeyaasha caalamiga ah iyo hay'adaha madaxa-bannaan si xeerka waafaqsan.
   d) Daymaha ay ka hesho dawladda sida baanka dhexe
   e) Ilihii kale ee ay ansixiyaan guddidu.

### Qodobka 22aad
### Isticmaalka Dakhliga

Hay'adda Caymiska Qaranku maaliyadda ay hesho waxay u adeegsanaysaa: -

1) Ku bixin gunnooyinka iyo socdaallada fidinta maamulka iwm.
2) Tababarrada, wacyigalinta dadweynaha iyo kharashyada kale ee u sahlaya Hay'addu in ay gudato waajibaadkeeda shaqo si dhamaystiran, isla markaana waafaqsan xeerkan.
3) Ku bixinta mushaharooyinka iyo gunnooyinka kale ee shaqaalaha ama guddiyada kale si waafaqsan oo uu dejiyey ama rasmiyeeyay ogolaanshaheeda hoggaanka sare ee Hay'addu.

### Qodobka 23aad
### Qaadhaanka/Khidmadda Cayminta ee Hay'adda

1) Shirkadaha Caymisku markasta oo ay shay ama walax & adeeg caymis fidiyaan, waxay Hay'adda Caymiska Qaranka u qaadayaan ama ku darayaan qadarka lacagta caymiska ee ay qaadayaan, khidmadda loo yaqaan ama loogu yedhayo khidmada Hay'adda Caymiska Qaranka si loogu maal-galiyo hawlaha shaqo ee Hay'adda.
2) Khidmadda caymis ee Hay'adda Caymiska Qaranka loo qaadayaa waxay noqonaysaa **2%** qiimaha guud ee adeega caymiska (Insurance Premiums) ka walaxda/shayga lagu caymiyey ka hor inta aan lagu darin wixii cashuuro ku waajibay, taas oo ku soo xeroonaysa 30 maalmood gudahood ka bilaabmanta maalinta la qaadey khidmaddaas, **si waafaqsan Xeerka Maamulka Maaliyada.**
3) Tilmaamaha guud ee khidmadda caymiska ee ku xusan faqradaha sare ee qodobkan, sida loo bixinayo iyo qadarka loo saarayo caymisyada kala duwan, waa in lagu faah-faahiyaa xeerka shirkadaha caymiska.

## QAYBTA SHANAAD:
## QODOBBO KALA DUWAN

### Qodabka 24aad
### Soo Saaridda Wareegtooyin (Directives)

Si loo fududeeyo dhaqan-galka xeerkani, Hay'addu waxay soo saaraysaa xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan galinayo xeerkan, **si waafaqsan Xeerkan iyo Dastuurka.**



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 25aad

## Laalis

Waxa uu xeerkani laalayaa xeer kasta oo aan waafaqsanayn ama ka soo horjeeda qodobbada xeerkan, Shareecada islaamka iyo Dastuurka JSL.

## Qodabka 26aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka ay Golayaasha baarlamaanku ansixiyaan isla markaana uu saxeexo Madaxweynaha JSL, laguna soo saaro faafinta rasmiga.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

______________________________

Md. Baashe Maxamed Faarax
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL

______________________________